

Xadaynta waxyaabaha jeediya ardayda fasalada Alberta

Juun 17, 2024 [Su'aalahaa warbaahinta](#)

Si loo ilaaliyo caafimaadka dhimirka ardayda loona yareeyo waxyaabaha jeedinaya, heerarka cusub waxay xaddidi doonaan isticmaalka qalabyada telefoonka gacanta gudaha fasalada iyo baraha bulshada ee kujira shabakadaha dugsiga.

Qalabka moobeelada gaarka ah iyo baraha bulshadu waxay noqonayaan kuwo xaadir ah dhammaan qaybaha nolosha fasalada Alberta-na kama duwana sidaas. Ayada oo ay noqon karaan qalab caawinaya waxbarashada, faallo celinta ka badan 68,000 waalidiin, macalimiin, saaxiibada waxbarashada iyo ardayba, aaya tilmaamay in qalabyada moobeelada gaarka ah iyo baraha bulshadu si xun u saamayn karaan guusha iyo badqabka maskaxda ee ardayga.

Ayada oo ku salaynaysa faalcelintaas, dowladda Alberta waxay dejin doontaa heerar la dhaqangalin doono marka la gaaro Sebtambar 1deeda si loo xaqiijiyo in qalabyada moobeelada gaarka ah iyo baraha bulshadu aysan carqalad ku noqon waxbarashada.

“Waalidiinta, macalimiinta, ardayda iyo shuraakkadaya waxbarashadu waxay cadeeyeen in isticmaalka qalabyada moobeelada gaarka ah iyo baraha bulshada ee fasalka dhediis ay walaac keeneen. Wuxaan qaadaynaa hal la qiyaasay si aan u ilaalino ardayda anaga oo xayirayna isticmaalka qalabka moobeelada xiliga waxbarashada si loo yareeyo waxyaabaha ardayga jeedinaya iyo u xoog sheegashada, loona badiyo wakhtiga waxbarashada loona xoojiyo caafimaadka dhimirka ardayga.”

Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada

Heerarka cusub ee ku saabsan qalabka moobeelada gaarka ah waxay dejinayaan xayiraado, nidaamyada sharci fulinta iyo kasoo reebista shaqaalaha dugsiyada dowliga ah ee K-12 ee Alberta,

gaarka ah, kuwa faransiiska ku hadla, dugsiyada gaarka ah, maamulada dugsiyada madaxa banaan iyo hawl wadeenada adeegyada carruurnimada. Waxyaabo laga reebayo ayaa la samayn doonaa gobolka oo dhan ardayda isticmaalaysa qalabyada moobilka ee caafimadka iyo baahiyaha caafimadamka, si loo taageero baahiyaha waxbarashadda la gaar yeelo iyo ujeedooyinka waxbarashada ah.

Masuuliyiinta dugsiyadu waxay hirgelin doonaan xeerarka maxali ahaan la sameeyay iyo nidaamyada isticmaalka qalabyada moobilka garka ah iyo saxaafada bulshadda gudaha dugsiyadoodo. Xeerarka iyo nidaamyadu waa inay ka tarjumaan heerarka gobolka laakiin wali waxay oggolaan doonaan madax banaanida iyo dabecsanaanta si loo buuxiyo baahiyoo gooni ah ee bulshadda iyo ardayda ay u adeegaan.

Masuuliyiintu dugsiyadu waxay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta la wadaagi doonaan xeerarka iyo shuruucda bilaha iyo todobaadyada soo socda.

Xaqiiqooyin Kooban

- Masuuliyiinta dugsiyada Alberta hadda waxay leeyihii madax banaanida ay ku dejiyan xeerkooda ku saabsan sida ay ardaydu u isticmaalan teleefoonada gacanta marka ay dugsiga joogaan. Xeerarka si aad ah ayay u kala duwan yihiin gobolka oo dhan.
- Sannadihii dhawayd, Ontario, Quebec iyo British Columbia ayaa dhamaantood ku dhawaaqay xayiraadaha gobolka oo dhan ama mamnuucida isticmaalka teleefoonada gudaha dugsiyada, ayada oo waxyaabaha qaar laga soo reebay.
- Alberta Education waxay la tacaamushay qaar kamid ah ardayda, waalidiinta iyo shuraakada waxbarashada.
 - Xog aruurin ku saabsan waalidiinta iyo daneeyeyaasha dugsiga ayaa lagu helay in ka badan 68,000 oo jawaabood. Ku dhawaad boqolkiiba 90 jawaab celiyayaasha ayaa wadaagay walaaca ku saabsan isticmaalka teleefoonka gacanta ardayga xaga dugsiga.
 - Daneeyeyaasha waxbarashada oo kala duwan ayaa ka qaybqaatay kullamada ka qayb qaadashada onlaynka ah.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Isticmaalka telefoonka gacanta gudaha ka qayb qaadashada fasalka](#)

Warbaahinta

- [Daawo shirarka jaraa'id](#)

Su'aalaha warbaahinta

Kevin Lee

780-427-5010
Xoghayaha Warbaahinta, Waxbarashada